TALLAALKA Gawracatada, Teetanaha, iyo Xiiqdheerta/Kixdheerta

WAXAAD U BAAHANTAHAY IN AAD KA OGAATO

1 Maxaad isu tallaalaysaa?

Gawracatada, Teetanaha, iyo Xiiqdheertu/Kixdheertu waa cudurro halis ah oo ay keento baktiiriya. Gowracadata iyo xiiqdheerta/kixdheerta dadka ayaa is qaadsiiya. Teetanadu waxay jirka ka soo gashaa meel jeexan iyo boog.

GAWRACATADU waxay keentaa in balqan culusi isku daboolo dalqada.

- Waxay keeni kartaa neefsashada oo dhib noqota, baralaays/faalid, wadnaha oo shaqada joojiya, iyo xittaa dhimasho.

TEETANADU (Daamman isdhaafshe) waxay keentaa in murquhu si xanuun badan u adkaadaan, badanaaba jirka oo dhan.

- Waxay keeni kartaa in daammanku "isdhaafaan" oo uusan dhibanuhu afka kala qaadi karin ama wax laqi karin. Teetanadu waxay keentaa in 10kii qof ee ay ku dhacdoba ay 2 qof u dhimato.

XIIQDHEERTA/KIXDHEER (Qufac Dheer) waxay keentaa qufac aad u daran oo aan kala go' lahayn kaasoo dhib ka dhiga in sebiyadu wax cunaan, cabbaan, ama neefsadaan. Qufacaas aan kala go'a lahayn wuxuu socon karaa todobaadyo.

- Taaasi waxay keeni kartaa qobow gala (pnemonia) qalal (duulduul iyo fiirin uu ku dhaygago), maskaxda oo ay wax gaaraan, iyo dhimasho.

Tallaalada Gawracatada, Teetanaha, iyo Xiiqdheerta/Kixdheerta (DTaP) waxay ka hortegi karaan cuduradaan. Caruurta lagu tallaalo DTaP badankood waa difaacan yihiin inta ay caruurta yihiin. Caruur kale oo farabadan ayaa cuduradan qaadaya haddii aan joojino tallaalidda.

DTaP waa nooc amaan ah oo ka soo jeeda tallaal hore oo la yiraahdo DTP. DTP hadda lagama isticmaalo dalka Maraykanka.

2 Yay tahay in lagu tallaalo DTaP goormana?

Caruurtu waa in ay tallaalka DTaP ka qaataan <u>5 tallaal</u>, hal tallaal mid kasta oo ah da' aha soo socda**:**

✓ 2 bilood ✓ 4 bilood ✓ 6 bilood
✓15-18 bilood ✓ 4-6 sano

Tallaalka DTaP waxaa lala qaadan karaa isla mar tallaalada kale.

3 Caruurta qaarkood waa in aysan qaadan tallaalka DTaP ama ay sugaan

- Caruurta cudurada fudud qaba, sida hargabka, waa laga yaabaa in la tallaali karo. Balse caruurta qaba cuduro dhexdhexaad ah ama aad u jiran waa in ay sugaan qaadashada tallaalka DTaP illaa ay ka bogsanayaan.
- Canug kasta oo tallaal ah tallaalka DTaP uu ku kiciyay cadaanyo naftiisu halis ku gashay waa in uusan qaadan mid kale.
- Canug kasta oo uu cudur kaga dhacay maskaxda ama habdhiska dareen wadayaasha 7 maalmood gudahood markii lagu tallaalay DTaP waa in uusan qaadan mid kale.
- U sheeg dhakhtar kaaga haddii canugaagu:
  - uu qalal ku dhacay ama uu dhulka ku dhacay ka dib markii uu qaatay tallaalka DTaP,
  - uu waday boohin aan kala go' lahayn 3 saacadood ka dib tallaalka DTaP,
  - ay qandhada haysaa ka badatay 105°F ka dib tallaalka DTaP.

Waydii dhakhtar kaaga warbixin dheeraad ah. Caruurtaan qaarkood waa in aysan qaadan dose kale oo ah tallaalka xiiqdheerta/kixdheerta, laakiin waxaa laga yaabaa in ay qaadan karaan tallaal kale oo aysan ku jirin xiiqdheertu/kixdheertu, lana yiraahdo **DT.**

4 Caruurta waaweyn iyo dadka waaweyn

DTaP shati looma siin dhalinyarada qaangaarka ku jirta, dadka waaweyn, ama caruurta ah 7 jirka ama ka da'wayn.

Haseyeeshee, dadka waaweyni wali waxay u baahanyihiin difaac. Tallaalka la yiraahdo **Tdap** waa la mid DTaP. Hal dose oo ah Tdap ayaa lagula taliyaa dadka da'doodu u dhexayso 11 illaa 64 sano. Tallaal kale, oo la yiraahdo **Td**, wuxuu difaacaa tetanaha iyo gawracatada, laakiin ma difaaco xiiqdheerta/kixdheerta. Waxaa lagu taliyaa 10kii sanoba mar. Waxaa tallaaladani leeyihiin Vaccine Information Statements (Warqadaha Warbixinta Tallaalada) oo ka duwan kuwan.

5 Waa maxay khataraha ka iman kara tallaalka DTaP?

In ay kugu dhacaan cudurada gawracatada, teetanuha, ama xiiqdheertu/kixdheertu baa ka khatar badan in aad qaadato tallaalka DTaP.

Si kastaba ha ahaatee, tallaal, sidi daawo kasta oo kale, wuxuu keeni karaa dhibaatooyin daran, sida cadaanyo daran oo uu kiciyo. Khatarta uu tallaalka DTaP ku keeni karo waxyeelo aad u weyn, ama dhimasho, waa mid aad u yar.

Dhibaatooyinka Fudud (Caadi)

- Qandho (qiyaastii illaa 1 canug 4tiiba)
- Guduudasho ama barar meeshii la muday (qiyaastii illaa 1 canug 4 tiiba)
- Xanuun ama danqasho meeshii la muday (qiyaastii illaa 1 canug 4 tiiba)

Dhibaatooyin kani waxay dhacaan badanaaba ka dib tallaalka 4aad iyo 5aad ee DTaP marka loo fiiriyo kuwii hore. Mararka qaarkood tallaalka 4aad iyo 5aad ee tallaalka DTaP waxaa la socda barar dhudhunka oo dhan ah ama lugta la muday, oo sii jirayana hal illaa 7 maalmood (qiyaastii illaa 1 canug 30 kiiba).

Dhibaatooyinka Fudud waxaa kaloo ka mid ah:

- Cabasho iyo sawaxan badan (qiyaastii illaa 1 canug 3 diiba)
- Daal ama cunto xumo (qiyaastii illaa 1 canug 10 kiiba)
- Matag (qiyaastii illaa 1 canug 50 kiiba)

Dhibaatooyinkani guud ahaan waxay soo ifbaxaan 1 illaa 3 maalmood tallaalka ka dib

Dhibaatooyinka Dhexdhexaadka ah (Caadi ma aha)

- Qalal (duulduul iyo dhaygag) (qiyaastii illaa 1 canug 14,000 ba)
- Oohin aan kala go' lahayn, muddo 3 saac ah ama ka badan (qiyaastii illaa 1 canug 1,000 kiiba)
- Qandho daran, ka badan 105° Fahrenheit (qiyaastii illaa 1 canug 16,000 ba)

Dhibaatooyin Daran (Dhif iyo Naadir)

- Cadaanyo daran oo uu tallaalku kiciyo (in ka yar 1 qof halkii malyankii tallaalba)
- Dhibaatooyin dhowr ah oo daran ayaa la soo wariyay tallaalka DTaP ka dib. Dhibaatooyinkaas waxaa ka mid ah:
  - Qalal muddo dheer jira, suuxsanaan aan laga soo kicin (coma), garashada oo isdhinta.
  - Maskaxda oo dhaawac joogta ahi gaaro.

Kuwani waa kuwa dhif iyo naadir ah oo ay adag tahay in la garto in tallaalku keenay.

In la ilaaliyo qandhada waa muhiim gaar ahaanna caruurta qalalku ku dhacay, sababtu waxay doonto ha ahaateee. Sidoo kale waa muhiim in qandhada la ilaaliyo haddii qof kale ee qoyska ka tirsan uu qalal ku dhacay. Waxaad qandhada iyo xanuunka ku yarayn kartaa adigoo canuggaaga siiya xanuun jebiye aysan asbiriin ku jirin marka la tallaalo, iyo 24ka saac ee ku xigta/soo socda, iyadoo la raacayo tilmaamaha ku yaal warqadda daawada.

6 Ka waran haddii uu cadaanyo dhexdhexaad ah ama daran kiciyo?

Maxaan ku gartaa?

Xaalad kasta oo aan caadi ahayn, sida cadaanyo daranoo uu kiciyay, qandha xoog leh ama qofka dhaqankiisa oo isbedela. Cadaanyo daran oo uu tallaal kiciyaa waa dhif iyo naadir.

Haddii ay dhacdo, waxay u badan tahay dhawr daqiiqo gudahood illaa dhawr saacadood tallaalka ka dib. Astaamaha waxaa ka mid noqon kara neefsashada oo dhibta, codka oo xirma ama xiiq-layn/dhuun-yeerin, furuuruc, midabka qofka oo isbedela, tabardaro, wadnaha oo aad u garaaca ama wareer. Haddii qandha xoog leh ama qalal jiro, badanaaba waxay dhacdaa todobaad gudahiis tallaalka ka dib.

Maxaan sameeyaa?

- **Wac** dhakhtar, ama qofka isla markiiba dhakhtar u gee.
- **U sheeg** dhakhtar kaaga waxa dhacay, saacadda iyo maalinta sidaasi dhacday, iyo goortii la tallaalay.
- **Waydii** dhakhtarkaaga, kalkaalisada caafimaadka, ama waaxda caafimaadka si aad u wariso cadaanyada uu kiciyay tallaalku adigoo buuxinaaya foomka Vaccine Adverse Event Reporting System (VAERS).

Ama waxaad warbixintan ku gudbin kartaa bogga internetka ee VAERS ahna **www.vaers.hhs.gov**, ama adigoo wacaya **1-800-822-7967**.

VAERS talo caafimaad ma bixiso.

7 Barnaamijka Qaranka ee Magdhawga Dhaawaca Tallaalka

Haddii wax lama filaan ahi dhacdo oo adiga ama ilmahaaga uu tallaalku ku kiciyo cadaanyo ba'an, waxaa la sameeyay barnaamij dowladda fadaraalku ku caawineyso in lagu daboolo kharajka daryeelka qofka dhibaatadu ka soo gaartay tallaalka.

Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan Barnaamijka Qaranka ee Magdhawga Dhaawaca Tallaalka, wac **1-800-338-2382** ama booqo bogga internetka ee **www.hrsa.gov/vaccinecompensation.**

8 Sidee baan wax intaa ka badan u ogaan karaa?

- Weydii dhakhar kaaga. Waxay ku siin karaan warqadda la socota tallaalka ama waxay kuu sheegi karaan ilo kale oo aad warbixin ka heli karto.
- Wac waaxda caafimaadka ee xaafaddaada ama maamul goboleedka (state) ee barnaamijka tallaalka.
- La xiriir Xarunta ka Hortagga iyo la Dagaalanka Cudurada (CDC):
  - Wac **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)**
  - Booqo bogga internetka Barnaamijka Tallaalka ee Qaranka ee: **www.cdc.gov/nip**

Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention
National Center for Immunization and Respiratory Diseases

Vaccine Information Statement
DTaP (5/17/07) - Somali 42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Minnesota Department of Health